Somaliska/Soomaali

In la codeeyo

Doorasho maalinta 9 Sabteembar 2018. Sidan ayaad u codeyneysaa doorashada baarlamaanka, hoggaamiyeyaasha degmooyinka- iyo gobolada.

Si aad u heshid xaqqa codbixinta waa in aad buuxisay 18 sano ugu dambeyn maalinta codbixinta. Arrintaasna waxay khuseysaa doorasho kasta. Macluumaadka diiwaanka dadweynaha 30 maalmood ka hor maalinta doorashada ayaa kala saarayo in aad codeyn xaq u leedahay iyo qeybta codeynta ee aad ka tirsantahay.

Waxaad codbixinta baarlamaanka xaqq u leedahay haddii aad:
- tahay muwaadin iswiidhish ah iyo haddii aad ka diiwaangashan tahay ama haddii aad ka diiwaangashanaan jirtay Iswiidhan.

Waxaad codbixinta hoggaamiyeyaasha degmooyinka- iyo gobolada xaqq u leedahay haddii aad:
- tahay muwaadin iswiidhish ah oo aad ka diiwaangashan tahay Swiidhan
- muwaadin ka tahay waddan ka mid ah waddamada Yurub ka mid ah ama aad muwaadin ka tahay waddanka Iislaandiya ama Noorwaay oo aad ka diiwaangashan Swiidhan
- muwaadin ka tahay waddan kale oo aad ka diiwaangashaneyd Iswiidhan saddex sano oo isku xigta maalinta codeynta ka hor.

Qofkii xaqqa codbixinta leh wuxuu heli doonaa kaadhka codbixinta

Qofkii xaqqa codbixinta leh wuxuu heli doonaa kaadhka codbixinta qiyaas ahaan saddex isbuuc ka hor maalinta codbixinta. Kaadhka codbixinta waxaa ku qoran doorashooyinka aad xaqa codeynta u leedahay iyo magaca, cinwaanka iyo wakhtiyada uu furan yahay xafiiska doorashada oo aad ku codbixin doontid. Kaadhka codbixinta waxaa sidoo kale ku qoran warbixin ku saabsan xafiisyada kale ee doorashada oo lagu codbixin karo ka hor maalinta codbixinta. Haddii aad dooneysid in aad codeysid ka hor maalinta codbixinta waa in aad wadataa kaadhka codbixinta xilliga aad codeyneysid.

Haddii aadan helin kaadhka codbixinta ama uu kaa lumay, waxaad ka dalban kartaa mid cusub degmada ama Hey'adda doorashada (Valmyndigheten).

Waraaqaha codbixinta

Waraaqaha codbixinta ee baarlamaanka waa jaalle, kuwa marka la dooranayo hoggaamiyeyaasha degmada waa caddaan, kuwa marka la dooranayo hoggaamiyeyaasha goboladana waa buluug. Waraaqaha codbixinta waxaa laga heli karaa meelaha lagu codbixiyo oo dhan iyo sidoo kale xisbiyada. Haddii aad waqtiga ka hor codeyneysid ama aad farrin-codeyneysid waxaad u baahan kartaa in aad xisbiyada ama degmadaada ka dalbatid ama ka soo qaadatid waraaqaha codeynta.

U codaynta xisbi
Waxaad marka ugu horreysa u codeyneysaa xisbi. Magaca xisbiga wuxuu ku qoran yahay warqadda codbixinta. Haddii aadan ka dhex helin warqadaha codbixinta magaca xisbigaada waxaad qaadan kartaa warqad cad oo codbixinta oo waxaad ku qoreysaa magaca xisbiga aad u codeyneysid si fiican.

Valmyndigheten

U codeynta qof
Haddii aad rabtid in la doorto mid ka mid ah musharraxiinta xisbiga, waxaad siin kartaa qofkaas codkaada adiga oo calaamadeynayo meesha afar geeska ah ee ka horreysa magaca musharraxa ee warqadda codbixinta. Waxaad calaamadeyn kartaa magaca **hal** musharrax oo keliya.

Waa in aad caddeysid in aad adigu tahay qofka aad sheegeysid

Waa in aad caddeyn kartaa aqoonsigaada si laguugu ogolaado in aad codeysid. Si aad u codeysid waa in aad adkeyn kartaa aqoonsigaaga adigoo muujinaya waraaqo aqoonsi ah, tusaale ahaan leysin ama baasaboor. Haddii aadan haysan warqad aqoonsi baa waxaa caddeyn karo aqoonsigaada qof kale, laakiin waa in uu qofku markaas tusiyaa warqad aqoonsi ah.

Codbixin

Ka codey xafiiska codbixinta ee xaafaddaada maalinta codbixinta
Waxaad ka codeyn kartaa oo keliya xafiiska codbixinta oo ku qoran kaadhkaada codbixinta. Xafiiska codbixinta wuxuu furanyahay oo keliya maalinta doorashada. Marka aad ka codeysid xafiiska codbixinta ee xaafaddaada waxaa laga calaamadeynayaa magacaada diiwaanka dadka codbixiyeyaasha, waxaana codkaada la gelinayaa sanduuqa codeynta.

Waxaad ka codeyn kartaa degmadaada ama degmo kale ka hor maalinta codbixinta
Codeynta ka hor maalinta codbixinta waxaa laga wadaa in aad ka codeysid meel kale oo aanan ahayn xafiiska codbixinta ee xaafaddaada. Horay usii codeyntu waxay soconeysaa ilaa iyo maalinta doorashada

Waa in aad wadatid kaadhkaada codbixinta marka aad codeyneysid ka hor maalinta codbixinta maadaama loo isticmaalayo kaadhkaas si loo diro codsigaada xafiiska codbixinta ee xaafaddaada. Meeshaas baa lagu tirinayaa codkaada.

Waxaad ka heli kartaa bogga www.val.se ama degmaddaada warbixin ku saabsan meesha aad ku codeyn kartid ka hor maalinta codbixinta.

Ka soo codeynta dalka dibaddiisa
Haddii aad dibadda joogtid waxaad codkaaga ku soo diri karta boosto ama waxaad ka codeyn kartaa safaarado iyo qunsuliyado badan oo swiidhan ah. Si aad warqad ahaan uga soo codeysid dalka dibaddiisa waxaad u baahantahay qalab aad ka dalbaneysid Hey'adda doorashada. Waxaad warqad boosto kula soo codeyn kartaa ugu horreyn 45 maalmood maalinta doorashada ka hor, waxaadna safaaradaha iyo qunsuliyadaha ka codeyn kartaa 24 maalmood maalinta doorashada ka hor.

Dadka qaar waxay codeyn karaan iyaga oo isticmaalaya farriin side

Waxaad wakiil ku codeyn kartaa haddii iyadoo ay sababtu tahay da'd weyni, cudur ama cuuryaannimo aadan naftirkaagu imaan karin goob codeyn ama meel laga codeeyo. Markaas waxaa wakiil kaa noqon kara ninkaaga, naagtaada, lamaanahaaga, carruurta ninkaaga, naagtaada, lamaanahaaga, caarruur aad awoowe ama ayeeyo u tahay waalidkaa ama walaahaa. Haddii uu jiro qof xirfad ahaan ama wax la mid ah kuu daryeela ama ku caawiya qofkaasi sidoo kale wuu noqon karaa wakiil. Waxaad sidoo kale codeyn kartaa adiga oo isticmaalaya farriin side haddii aad xabsi ku jirtid ama rugta daryeelka dambiileyaasha. Markaas xitaa shaqaaluhu wuu ku caawin karaa. Haddii aad joogid jidka uu maro boostaalaha reer miyiga waxaa farriin side kuu noqon kara boostaalaha reer miyiga. Haddii aadan aqoonnin qof wakiil kuu noqon kara, degmadaaday ayaa ku debbiri karta cod qaabile guriga kuugu imaanaya. La xiriir degmadaada. Haddii aad codeyneysid adiga oo farriin side isticmaalaya waxaad u baahan tahay qalab khaas ah oo aad ka dalbaneysid degmada ama Hey'adda doorashada.